

..

Kufsi Iyo Kadeed Dumar

Qoraaga Buugga

Maxamed cismaan yuusuf (Qoslaaye)

DAABACAADI 1-AAD

kufsi iyo kadeed dumar

Xuquuqda buugga

Xuquuqda buuggu waxay u dhawrsan tahay qoraaga buugga, lama daabacan karo la mana rogan karo iyada oo aan amar buuxo laga haysan qoraaga buugga.

Wixii talo , tusaale iyo toosin ah waxaad iigu soo hagaajin kartaan

*Emailka:***halabuur.qoslaaye@email.com**

*Talefon:***0611114341 ama 0907715359**

*Jeldiga buugga waxaa qabeeyey oo qurxiyay
(aba graphics co)*

*Magaca bugga waxaa uu maskaxdiisa ka soo maaxay
aniga oo ah qoraaga buugga .*

Tusmada Buugga

Xuquuqda Buugga	2
Tusmada Buugga	3
Hibeyn.....	5
Mahadnaq	6
Hordhac	8
CUTUBKA:1AAD “KUFSIGA IYO WIXII LA HALMAALA”	
Waa Maxay Kufsi?	12
Muxuu Yahay Xukunka Qofka Wax Kufisga?.....	13
Noocyada Kufsigu.....	14
Astaamaha Kufsigu.....	16
Sidee Loo Qiimeya Xalada Kufsigu	17
Maxaa La Gudboon Qofka Kufsigu Looqeystay?.....	19
Gabadha Maku Sababi Kartaa Nafteda In La Kufso?	20
Kufsigu Haweenka Soomaaliyeed Yaa Masuul Ka Ah?.....	22
Bulshada & Meekhaanka Dumarka	26
Haweenka Soomaaliyeed Hal Maalin Oo Dabaal Daga Ma Mudna.....	27
Sidee Ku Noqon Kartaa BulashaduMid Kamaran Kufsi?	31

kufsi iyo kadeed dumar

CUTUBKA:2AAD “QISOYYIN CIBRO-QAADASHO LEH”

Qisadda 1aad:	35
Qisadda 2aad.....	43
Qisadda 3aad.....	45
Qisadda 4aad :	47

CUTUBKA:3AAD “MURTI LOOGA HADLAY KUFSIGA’

Gabay: Kufsigu Ka Daran Geerida	50
Gabay:Kufsigii Goldogob.....	52
Maansada Curdin-Dhadhiye	53
Gabay: Fajac	60
Maanso: Kufsigu Haweenka	62

CUTUBKA 4AAD:

Gunaanad	63
----------------	----

kufsi iyo kadeed dumar

Hibeyn

*Buuggan uu magaciisu yahay “**kufsi iyo kadeed dumar**”
Waxaan u hibeeyay dhamaan ummada Islaamka ah , meel
kasta oo ay daafaha dunida ka joogaan, gaar ahaan inta
afka somaaliga ku hadasho.*

Mahadnaq

*Alxamdulilahi rabbil caalamiin, ugu horrayn
ilaahey ayaa mahad dhamaanteed iska leh,
naxariis iyo nedgalyana nabigeenna dushiisa ayay
ahaatay. Mahad waxaa iska leh illaahey oo ii
suurta galiyey inaan dhiganahan hortiinna yaalla
ku qoro muddo kooban, isla markaasna idiin soo
bandhigo. Waxa mahad leh illaahey oo ii suurta
galiyey inan dhiganahan qoro adna aad akhrisatid
si aad ugu faa'idaysato, ciddii aad gaadhsiin
kartana ugu gudbisid.*

*Marka labaad waxaan si kal iyo laab ah ugu
mahad celinayaa labadayda waalid, hooyo xaawo
maxamed cali iyo aabbo cismaan yuusuf axmed ,
iyo dhamaan walaalahay ila dhashay oo iyaguna
ikala qayb qaatay soo saarista buuggaan waxaan
kale oo mahad gaar ah siinaya asxaabtayda oo ila
garab taagneed caawinaada inan qoro buugan
qaasatan Labadayda garab Cali Cabdulah
Mukhtar iyo C/raxmaan c/daahir Aadan*

kufsi iyo kadeed dumar

*Ugu danbayntii waxaan mahad ballaaran u
jeedinaya tafatiraha buugaan oo runti waqti iyo
maskaxba ii huray oo ah C/raxmaan maxamed
c/qaadir Ilaahay waxa aan ka baryayaa in uu igu
asturo hawlaha guud ee aan bulshada
uqabanaayo oo ay kamid tahay hawlaha buuggan
"kufsi iyo kadeed dumar"*

Hordhac

Dadka qaar ayaa ku dooda inuu kufsigu

*dumarku ahaa dhaqan soo jireen ah, oo waligeed
dumarka la kufsan jiray. Inta aan caqliyaystay
waligay ma maqal inuu ahaa dhaqan soo jireen ahaa.
Sheegashada noocaas ah ayaa ka yaabisay Soomaali
badan!! Wanna tan iku kaliftay in aan qoro
dhiganaha aan ugu magac daray “Kufsi iyo kadeed
Dumar” Anigu waxaan garaadsaday ayadoo
gabadhaha Soomaaliyeed la maamuso oo geel iyo
hanti laga bixiyo, show ileen waxaa jiray wax naga
daahsoonaa oo la qarin jiray!!*

*Waxaa jira rag waaweyn ku an dagoonaya in arintaas
tahay wax caadi ah oo aan dhib lahayn, isla markaana
aan mudnayn in laga hadlo oo idaacadaha la soo
dhigo.*

*Dadka aragtida noocaas ah qaba ayaa raba inay
daboolaan xadgudubka dumarka lagu hayo.
Ujeedka u weyn ay ka leeyihiin aritan ayaa ah inay
qariyaan kufsigu ka dhaca deegaannada ay ka soo
jeedaan.*

kufsi iyo kadeed dumar

Tan iyo intii ay soo shaac baxday kufsigu loo gaysanayo dumarka iyo dhibka uu leeyahay kufsigu, ayaa waxaa sii xoogaysanaya Soomaalida ka dhiidhinaysa xadgudbka ka dhan dumarka iyo caruurta. Waxaa muhiim ah in la ogaado in kufsigu qabiil iyo gobol toona lahayn.

Waxaa kaloo waajib ah in loo gargaaro dhibanaha Soomaaliyeed meelkasta uu ka soo jeedo, maxaayeelay muhiimku ma ahan qabiilka uu yahay iyo halku dhibka ka dhacay ee waa ka hortagga dhibka iyo dhoowrista xuquuqda muwaadinka Soomaaliyeed.

Dumarka ama ciyaalka oo lagu xadgudbaa waa dambi weyn oo aan la aqbali karin, waxaana waajib nagu ah in aan ka hortagno oo ka hadalno. Macquul ma ahan in aan indhah ka qarsano, isla markaana aan ka dhigno wax aan saas u weynay.

kufsi iyo kadeed dumar

*Bal sawiro gabadha la kufsaday inaad adiga tahay?
inay walaashaa tahay? inay tahay taad dhashay?
inay tahay taad u dhaxday? inay tahay Hooyadaa?
Maxaad dareemi lahayd?
Dhacdooyinkaas iyo dhibka lagu hayo dumarka iyo
caruurta waxay igu kalifeen in aan qoro buggan iyo in
aan sameeyo barnaamijyo arimahaas looga soo
horjeedo. Waxaan si joogta ah isha ugu hayn doonaa
tacadiga iyo dhibka loo gaysanayo shacabka
Soomaaliyeed ee aan awoodin inay is difaacaan.*

kufsi iyo kadeed dumar

Cutubka:1aad
“Kufsigu iyo wixii la halmaala”

Waa maxay kufsi?

Kufsi waa in qofka lagu qasbo galmo Uusan raali ka ahayn , iyadoo loo adeegsanaayo awood iyo handadaad xoog ah ,ama in qofka loga fa'iidaysto xaalad uusan miyirkiisu joogin sida in la suuxiyo ama maan dooriye la siiyo , Kufsigu waa mid khilaafsan shareecada islaamka.

Muxuu yahay Xukunka qofka wax Kufisga?

Kufsigu asalkiisa waa zino, wuxuuna la xukun

yahay zinada, qofka wax kufsada waxaa lagu oogayaa xadka zinada, haduu yahay mid aan horay u guursan waa 100 jeedal, haduu xaas leeyahay ama guur horay u soo maray waxaa lagu dilayaa dhagax, Waxaase u dheer hadii handadaad, hub, dil iyo afduub la socdo kufsigaa, inuu qaadanayo xukunka zinada isla markaan qaadanayo ciqaabta kuwa jidgooyada sameeya.

Waxaa lagu qaadayaa xukunka Aayadda 33-aad ee suuratul Maa'idah.

انَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الْأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ مِنْ خِلَافٍ أَوْ يُنْفَوْا مِنَ الْأَرْضِ ۚ ذَلِكَ لَهُمْ خِزْيٌ فِي الدُّنْيَا وَلَهُمْ فِي الْآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ (33)

Qofkaas waa in la dilaa, ama la salbiyaa, ama si is dhaaf ah gacmaha iyo lugaha looga jaraa, ama la musaafuriyaa. Intaas oo cuquubah mid ka mid ah ayuu mudanayaa, xataa haduu afduubo oo uusan xoogin. Sida aad u jeedaan diinta islaamka meel adag ayay ka istaagtay kusfiga iyo xadgudubka. Diinta Islaamka waxay ilaalisaa xuquuqda dadka, xuquuqda dumarka. Sidaas oo kale waxaa la rabaa shacabka Soomaaliyeed inay ilaaliyaan xuquuqda qofka Soomaaliyeed.

Noocyada kufsiga

Kufsigu wuu noocyo badan yahay marka loo eego

siday dunidu ku qiimeyso oo waxa jira kufsiyo ay yidhaahda waxa uu dhex marey xasaska is qaba tusale ahaan haddii ninku gabadhiisa ku qasbo inay la samayso ijtimaac wadamada reer galbeedka waxa uu ka yahay kufsi dumarkuna waa ku dacweeyaan raga inaga se diinteenu ixtiraam ku saabsan ijtimaaca qoyska ayay inoo jideysay aynu eegno siyabaha ay reer galbeedku u kala saran kufsiyada

Awood adeegsiga kufsiga

1:kufsi awood ah = kani waa ka u badan waxaanu u dhacaa marka dhibanaha lagu qasbo galmo aanu rali ka ahayn iyadoo siyaabo kala duwan loo adeegsanayo si loo fushado hawshaas

2:Kufsi Da'da la xiriira = kani waxa uu la xidhiidha da'da sida kufsiyada loo geysto caruurta amaba ay iyagu isu geystaan

kufsi iyo kadeed dumar

3:zinada= kani waa nooca ugu khatarsan waana mid laga badheedho faro xumayntiisa wana ka geyigeena badanaa caanka ka ah

4:Kufsi wadaag ah= waa kufsigu u dhexeeya lamanaha is qaba ama wada jooga ama kuwa xidhiidhada kale leh iyadoo loo adeegsanayo fulitaanka kufsigu hanjaabado jidheed iyo mid maskaxeed badanaa dhulkeena kama dhaco oo diin ahaan waxaynu leenahay nidaam dhawrsoon oo la xidhiidha ijtimaaca

5:Kufsi qumman = waxa uu ka dhex dhacaa dadka is yaqaana amaba asxaabta ah dhulka islaamka kama dhaco inta badan waxa adeegsada gaalada.

6:kufsi darran= kani waa kufsigu aadka u daran amaba jariimada ah ee qofka naftiisa xitaa halis loo geysto iyadoo lagu sameeyo dhaawacyo daran hadaanu naftaba ku waayin

Astaamaha kufsiga

1. Dhawac ka baxsan xubinta taranka oo muuqda
2. Dhawac soo gadhay xubinta taranka
3. Astaamo muujinaya nafsad ahaan in qofkan dhibane yahay
4. Xanuunada laysugu gudbiyo galmada oo laga helo qofka loo geystay kufsiga sida hepatitis(cagaarshowga), syphilis(waraabow), gonorrhea(jabtada), iyo HIV AIDS
5. Iyo uur ay qaado qofka dhibanaha ahi taasi oo inta badanaa dhicin

Sidee loo qiimeya xaaladda kufsigu

Waxaa kufsigu lagu xaqiiqsan karaa calamado badanaa muuqda oo lagu arko oogada jidhka sida dil dilaac iyo dhawacyo loo geysto qofka haddii lagu qasbay kufsigu sidoo kale waxa laga yaaba qofku inuu werwer iyo isku buuq ku furmo inta marxaladan kufsigu uu ku jiro naftiisana ay ku noqoto mahadho lama ilaaban ah

- Waxa muhiim ah marka aad kiis kufsi ah badhayso xaladiisa kufsi inaad samayso qiimeyn caafimaad oo dhamaystiran taasi oo la xidhiidha hubinta unugyada taranka in dhawac soo gaadhay laga heli karo manida amaba shahwada dhib geysta sidoo kale aad ka hor tagto siisana dawoyinka ka hortaga uurka muddo 24 saac gudahood

kufsi iyo kadeed dumar

- Inaad ururiso wax alla wixii markhaati noqonaya amaba cadaynaya kufsigaa ee aad ku aragto oogada qarsoone taranka iyo tan dibadaba sida mani , dhawacyo , iyo dhibo kaleba
- Inaad qiimeyso xalada nafsiga ee dhibanaha sidoo kale aad siiso talo ku sabsan nafsadiisa una dirto xarumaha la talinta cilmi nafsiga si loo dhiso maskaxdiisa werwerkana loo ilawsiiyo garab istaagna loo muujiyo

Maxaa la gudboon qofka kufsiga loogeystay?

Dareenka uu dareemayo qofka la xoogay ma ahan mid aan qoraal iyo hadal ku cabiri karo!! Runtii qof la xoogay oo la bahdilay waa arin ma hadha ah oo qofka waligiis daba soconaysa. Qofka arinkaas loo gaystay si kasta uu iskugu dayo inuu hilmaamo ma hilmaami karo. Dadka inta sheegta waxaa ka badan inta qarisa, waana tan keentay in dadka qaar yidhaahdaan kufsiga waa dhaqan soo jireen ahaa!! Haddii uusan qofka helin qof uu kala hadlo oo arintiisa ka tala siiyo, waxaa qabsanaysa maahmaahdii

Soomaaliyeed ee ahayd “Waxaad qarsatid waa ku qarsadaa”

Waxaan ugu baqayaa qofkii dhibkaas qabsadaa inuu ka hadlo oo dadka ahalka u ah u sheego, haddii ay isku dayaan in ay aamusiyaan oo ku qasbaan in qofkaas wax sheegin, waa in qofka ku dhaqaaqaa talaabo kasta oo caawin karta, isla markaana cadaaladda keeni karta dadkii dambigaas sameeyay

Gabadha maku sababi kartaa nafteeda in la kufsdo?

Haa!!! Gabadha waxa ay nafteeda u horseedi kartaa

kufsi wallow aysan jirin gabar rabta in la kufsado ama la xumeeyo balse waxaa jira dhowr sabab oo hadii ay sameeyso usoo jiidi karta dhibaato , waxaa kamid hablaha qaar oo ku labista dhar aan jirkeeda daboolin ama asturneen , sido kale in ay ku labisato dhar qafiif ah oo sanadadaan danbe rer galbeedka so galinayaan gudaha dalkeena waliba iyaga oo si xirfadeesan ugu isticmaalaya magacyo somaali ah oo markaas la xiiseeyo sida magacyada fanaaniinta , madaxda iwm , waxa kale oo dhacda in ay hablaha is mariyaan cataro, baraafluuno , carfisooyin kuwaas oo soo jiidanaya raga inta aan kor kusoo xusay hadii ay haweenayda ama gabadha ay isticmaasho oo ay soo marto wadooyinka raga fariista waxaa inta badan dhacda in ay raga markaas ku mashquulaan amase uu dareen ka galo waliba Ragga kala wanaagsane waxaa dhici karta in ay dabo racaan inantaas hadii ay is adkeesana ay xumaan iyo kufsi ula kacaan haddaba yaa sababay kufsigaas waxa isku sababay gabadha waayo ma dareensaneen asturnaan la'aanta in ay dhibtaas u horseedayso .

kufsi iyo kadeed dumar

Ragga inta badan ma fiiriyaan hablaha asturan/xijaaban waayo

waxaa difaacaya allah SWT maddama ay allihii abuuray ay u noqotay .

Gabdhaha sharafta badan waxaan ku boorinayaa in ay dhowrsanaadaan oo ay asturaan jirkooda. “ Alle dhibaato ma idiin tuso.”

Kufsigu Haweenka Soomaaliyeed Yaa Masuul Ka Ah?

Kufsigu haweenka Soomalaiyeed waxaa masuul ka ah raga Soomalaiyeed ee u diiday in dalkoodii dago, oo ay xasiliyaan si sharafta haweenkeena iyo caruurteena aan ugu xafidno. Dalkoodii oo ay sharafta ku lahaayeen kuna asturnayeen. Kuwa dalkoodii lagu dhex kufsanayo, kuwa dalalka dariska ah lagu kufsanayo, kuwa saxaaraha Yemen iyo Libia lagu haysto. kuwa South Afrika ayagoo uurka leh lagu kufsanayo oo hadana lagu dilayo, kuwa South Sudan ay duurka ku haystaan oo ilmaha u dhaldhalaya ayagoo katiinado lugaha ugaga xirxiran, iyo kuwa wadamadaan reer galbeedka ku xumaanaya ama ku duloobay, dhammaan waxaa masuul ka ah raga Soomaaliyueed nooc walba oo ay yihiinba, hadday yihiin siyaasiyiin, oday dhaqameedyo, culima`awdiin iyo aqoon yahayba. Marka aan leeyahay raga Soomalaiyeed anigaa lambar kow ka ah, war ragoow sida aan isku dhaano oo aan ilaahay ka baqno masuuliyadeenana aan qaadano haddii kale magaca iyo maqaamka aan sheeganayno aan iska dhigno, dumarkeenu rag weyn mahayaane. Waxaa masuul ka ah madaxda u dhaaratay inay qarankaan baabay u adeegayaan, dadkooda u adeegayaan, dalkooda difaacayaan, hadday ahaan lahayd sharafta dadkiisa io

kufsi iyo kadeed dumar

difaaca xuduudaha iyo waxa ku dhexlool ama ku dhex jiraba.

Waxaa masuul ka ah nin walba oo ka shaqaynaya burburka dalkeena, dadkeena, iyo horumarkeena. Waxaa masuul ka ah Kuwii keenay ciidamada shisheeye, hadday joogaan iyo hadday dhinteen ama maqan yihiinba.

Waxaa masuul ka ah kuwa u adeegaya shisheeyaha ee danaha dalal kale fulinaya ayaagoo qabiil ku shaqaynaya. waxaa masuul ka ah kuwa qabyaalada, goboleysiga, kala qoqobka, iyo qurunka u adeegaya. Waxan ugu baaqayaa dhammaan bulshada Soomaaliyeed mel walba oo ay joogaan inay arintaan foosha xun iyo kuwii ka horeeyeye ee dhacayba ay ka mudaharaadaan, kana dhiidhiyaan, oo ay muujiyaan inaysan u dulqaadankarin xadgudubyada lagula kacayo duumrkeena sharafta badan ee ah Hooyooyinkeen, walaalaheen, gabdhaheenii, iyo xaasaskeenii intaba.

Dhibaatooyinka Loo Gaysto Hawenka Falalka ugu badan oo lagula kaco dumarka waxa kamida kufsigu oo ay ku waayaan sharaftooda iyo qadarintii ay ku dhex lahayeen bulshada dhexdeeda. Waxaa lagu tilmaama dumarku inay yihiin aas aaska kowaad ee qoyska hadana waxaa moodaa in aysan qaar kamida ku xushmeen haweenka oo ay xadgudub ku sameeyaan.

kufsi iyo kadeed dumar

Haweenku waa ay nala dhashen waana nadhalen
waana ay noo dhaxaan inaan dhoorno maahee ma
dhib bay naga mutaysteen.

Ma waxan ilawnay dhibaataadii iyo xanunkii ay nala
soo mareen markay caloosha nagu wadeen iyo
markay na dhaleen dhibkay nala soo maren?

Kufsigu waa dhibatada ugu wayn oo lagula kaco
haweenka taas oo sababta in ay naftooda kuwaayaan
ama ay galaftan oo ay kuwaayaan noloshooda. Tan
uguwayn oo ay lakulmaan ayaa ah inay waayaan qof ay
nolosha la qaybsato oo ay la aqal gasho taas waxaa u
sababa falki ay kula kaceen qaar kamida dhalinyarada ay
wada dagaanka yihiin oo hadana muslimin ah. qola kasta
ama bulsha walba waxa ay dhoortaa oo ay haysataan
dhaqankeeda iyo hidaheeda hawenka waa lama taabtaan
oo waxay u arkaan inay yihiin sida muraayad o kale oo
haday mar jabtana aan laysku keeni Karin. Bulshadaas ka
sakaw diinteena islamanka ma ogola in aan qof haweenka
ku xad gudubno o aan hadana jir dil u gaysano taasina
waa waxaan ka suuroowin qof leh niyad saafiyaa iyo
qalbi dabacsan.

Qofna ma ogola in uu walaashii hooyadii ama marwadiisa
lagu xad gudbo hadaba maxaa hawenka kale loogu xad
gudbayaa Mayna dhalin hooya anagoo kale ah?

Dareenaka xaga jinsiga ah waa mid laga rabo inuu

kufsi iyo kadeed dumar

xagameeyo qofka donaaaya inuu ku xad gudbo jinsiga kale taasina uu kari karo qofka Jecel inuu ku xad gudbo qof walaashii oo kala ah . Haweenka lagula kaco Kufsigu waxaa mararka qaar ku dhacda inaan helin dad garab istaga ilaa heer Maxkamadeed oo xaqeeda u dooda walaw halka qaar ayna helinba dad wax kala Qabta dhibaata ay martay. waxaa jira in mararka qaar la afduubto qofka haweenka kadibna laga ganacsado jirkooda ama Naftooda iyadoo qaarkoodna laga weepsado wadanada dariska la ah Goobta laga afduubtay.

Bilooyinki u dambayay waxaa yaraaday Falalkii lagula kacayay haweenka haba ugu badnaatee falka Kufsigu ah oo in muda caado ka noqday qaar kamida deeganada dalka. haweenku meel walba oo ay dunida ka jogaan Kufsigu waa lagula kacaa balse waa kuwa aan Goos goos ah taas oo sababtay in haween badan ay naftooda halis galiyaan.

Bulshada & Meekhaanka Dumarka

Dumarku waa udub-dhexaadka bulshada

Soomaaliyeed. Kala guursashada iyo xididnimada ayaa ummadda isaga dhiga ul iyo diirkeed, iyagaana ammaantaas iska leh. Gabadhu beel way ka dhalataa mid kale way u dhaxdaa ayadaana gunudda xiriirka laba qoys, labo reer iyo labo beelood. Hormuudnimada hooyada waxaa markhaati cad u ah inay jiraan beelo ku abtirsada magacii hooyadood, haddana beel kale kasoo jeedday. Isir-wadaaggu ma dhinto oo muddo dheer buu soo taxnaadaa, wax badan ayaana laysugu taraa. Abaalka dumar bulshada u galo ma loo tixgeliyaa waa maya jawaabtu.

Dumarku waa Calansidaha Ummadda Soomaaliyeed. Waa kuwa dhaliya xiriirka ehelnimo iyo isku dhafka bulsho. Waa macallinka afbara ubadka, haddana barbaariya. Waa ilaaliyaha Hantida iyo hab-waanaag Maamulka Qoyska.

Waa kalkaaliyaha ragga iyo taakulaynta deriska. Maaraynta hufan, bilicda san iyo baraaraha qoysku gaaro iyagaa dhaliya, haddana ammaanta raggaa isa siiya. Sidatanu xaq-soor bulsho ma ahan ee caddaalad-xumada dumar lagu hayo dib haloogu noqdo.

Haweenka Soomaaliyeed Hal Maalin Oo Dabaal Daga Ma Mudna.

Waxaa Aduunka laga xusaya maalinta 8, Maarso oo loo Asteeyey Maalinta Haweenka Aduunka oo Soomaaliyana ku jirto waxaa is waydiin mudaan Haweenka Soomaaliyeed ma` xaqbaa inaan hal”maalin u Aqoonsano?.

Umadd kastaa waxay leedahay haldoor laf dhabar u` ah jiritaankooda aniga oo Anan ka hadlayn ummaddaah kale waxaan rabaa inaan qormadaan ku eego Haweenka Soomaaliyeed iyo haybadda ay mudan yihiin inaan lagu soo koobi karayn hal”maalin oo loo calaamadeeyo waayo hal bawlaha Umadda Soomaaliyeed ama hal doorka ummadda Soomaaliyeed? Haweenkeena Soomaaliyeed waa kuwo qaali nagu ah oo` aan lagu soo koobi karayn Hal`maalin inay leeyihiin taas badalkeed haweenka Soomaaliyeed waxaay naga mudan yihiin inaan maalin kasta saacad kasta iyo xili kastaa inaan xusno kuna dadaallo daryel kooda iyo wanaagoodda waa hadii aan nahay Raga Soomaaliyeed oo baryahaan fartu ku godan tahay.

kufsi iyo kadeed dumar

Haweenka Soomaaliyeed waa laf' dhabarka Ummadda
Soomaaliyeed tariikhada Hablaha Soomaaliyeed waa mid
gun adag leh waxaan tariikhada ku hayaa xiligii
Gobonimmo doonka haweenka

Soomaaliyeed inay ahayeen kuwo ka feejig naa raga ayaga
oo ka mid ahaa haldoorkii ku hawlanaa in Ummadda
Soomaaliyeed ay helaan xornimadooda. Xiligii Gumaysiga
Xiligii Gumaaysiga lala dagaalamayey Haweenkeena
Soomaaliyeed ayaga oo ilamaha Korinaaya ayaga oo uur
leh ayaga oo dumara ayey hadana waxay ahayeen kuwo
Garaab tagnaa ragooda Soomaaliyeed waxaana Qarkood
geeriyooden ayaga oo la dagaalamaya Cadowgii
Ummadda Soomaaliyeed waxaa kale oo jirtay inay
xabsiyadii Gumaysiga galen kuna dhinteen kuna umuleen
ayaga oo ku jira xabsi gudihiisa. Alle ayaa gudi kara
xaquuqda hooyada Soomaaliyeed Allaha wayn ayaa gudi
kara xaq ay leedahay Hooyo Soomaaliyeed allaha wayn
ayaa Gudi kara Hablaheena xaq ay inagu leeyihiin
hal,maalina kuma fila inaan u Calaamadno ee xili kasta
waxay naga mudan yihiin wax qabad xushmo iyo u hagar
bixiid joogtaa nin kasta oo Soomaaliyana waa waajib
saran taas.

kufsi iyo kadeed dumar

Qayb kamida qaybaaha Haweenka Soomaaliyeed ay dheeryihiin haweenka Aduunka kale Geesinimo Qodobka koobaad waa geesinimo buuxda oo ay ku kal soonyihiin naftoota oo ay amiin san yihiin inay damaanaad qaadi karto mas,uuliyadda umad dhan waxaana markhaati kuku filaan markii Dawladii

Soomaaliya Bur,burtay halka kaliya ee loo baxsaday waa haweenka Soomaaliyeed dal iyo dibad`baa , ayaga oo dusha u ritay badbaadinta Ummadda Soomaaliyeed alle ayaa wax badbaadiya laakiin waxay quudiyeen kumanaan Soomaaliyeed. Isku xirka bulshada Soomaaliyeed Qodobkaka labaad ee ay uga duwan yihiin hablaha aduunka hablaha Soomaaliyeed Gabadha Soomaaliyeed waxaay isku xirtaa bulsha ama labo Qoys taas oo ah in uu guursdo nin ka soo jeeda qabaa,iil kale kadibna labada qabaa,iil ay dhex marto Xididtinimo.` Xididtinimo waa hab xiriir oo ka dhexeeya labo bulsho oo, ay isku xirtay Gabar Soomaaliyeed waana habka hablaha Soomaaliyeed ay uga duwan yihiin Haweenka Aduunka.

Marti soorka Marti soorka Gabadha Soomaaliyeed xiliga ay timaado marti ama dad safara Gabadha Soomaaliyaad waxay karti buuxda u leedahay inay marti soor u samayso martita ku soo hoyatay hoygeeda ama Qoyska ay hooyada u tahay hadii uusan joogin mas,uulka Reerka waxaa

kufsi iyo kadeed dumar

mas,uuliyada qaatata Hooyada Soomaaliyeed ayada oo martita ku maamuusta hanaan heersara miyi iyo magaalaba taasina wa hanaan kale oo ay uga duwan yihiin haweenka aduunka kale. Gabo`gabo Waxaan ku soo koobaya Haweenka Soomaaliyeed ma` mudn maalin kaliya ee waxay mudan yihiin in maalin kasta ayaga la xuso waxay mudan yihiin in la hormariyo Caafimaadkooda Waxbarashooda iyo daryeelkood.

Haweenka Soomaaliyeed waa wax soo saarka dhammaan wax kasta oo ummadeena faa,iido u leh hadii ay noqon lahayd dhaqaale nabaad raadinta ayaga oo ku cabira hab suuganeed daryeelka qoysaska Soomaaliyeed dal iyo dibaad.baa waxaa waajib inagu ah inaan ogaano hal bawlaha ummadeena inuu yahay Haweenka Soomaaliyeed.

Sidee Ku Noqon Kartaa Bulashadu Mid Kamaran Kufsi?

Bulsho kasta waxay leedahay dhaqan iyo hiddo ugaar ah,haddaba bulshadeenna somaliyeed waa mid dhabtii dhaqankeedu ka maran yahay kufsi iyo xad gudub loo gaysto gabdheheena soomaliyeed, balse waqtiyadan danbe waxad moodda inay inagu soo badanayso falalka ka dhanka ah gabdheheenna soomaaliyeed taasoo daliil cad u ah in laga tagay dhaqankeenii Suubanaa iyo dhaqanka diinteenna islaamka ah taasoo amraysa in lagu dhaganaado Shay kasta oo wanaagga ka talinaya , waxaynu ku noqon karna bulsho ka maran kufsiga iyo waxyaabahas foosha xun oo iska dhan inaynu marka hore ulaabano dhaqankeena soomaaliyeed iyo keenna islaamka .

Si aynu u xaqiijino kamarnaanta bulshadeenna falkaas foosha xun waxaynu ubahan nahay qodobbo dhowr ah oo ay kamid yihiin kuwan soo socda:-

Tarbiyeenta Ubadka:-

Tarbiyaynta ubadka ama dhaqanka wanaagsan in la baro ubadka waa mid ka qayb qaadan karta waxa uu noqonayo ilmahan marka uu qaangaaro amaba mustaqbalkiisa danbe,haddaba in labaro dhaqanka wanaagsan ubadkeena wiilal iyo gabdhaba waa mid waajib ku ah waalidka ubadkaas dhalay

kufsi iyo kadeed dumar

dhabtii waxaynu ognahay ruux kufsi iyo wax lamida in dhaqanka wangsana in labaro markiisii hore laga dayacay taas ayaa waxay ukeeni karta inuu ku dhaqaaqo falalkaas iyo kuwa lamid ah ,sababtoo ah shayga ka dhiman ayaa waxa uu yahay barashada dhaqanka wacan.

Sharciga Eebe ku dhaqankiisa:-

Sharciga Eebe oo ah mid looga badbaadi karo wax kasta oo xumaan ah ama bulshadeenna soomaliyeed ku dhib ah,waxa looga bahan yahay bulshada hadday ubahan tahay inay noqoto mid kamaran kufsiga waxa laasim ku ah inay noqoto mid ku tagan sharciga alle dhan kasta ee Kamid ah dhinacyada nolosha , taasoo aan loo bahnayn in qofka danbiga gaystay laga khafiifiyo ama loo muujiyo calool jileec.

Wacyi galinta dhalinta:-

Wacyi galinta guud ahaanba waa mid door wayn ka ciyaarta in wax la toosiye bulsho dhexdeed , iyadoo intaas oo dhan saamayn ku yeelan karta bulshada, ayaa si khaas ah looga bahan yahay in laga wacyi galiyo dhalinta waxyaabaha u keeni kara naftooda khattar sida inay danbi galaan ama iyaga laga galo danbi ,waxaynu oran karna dhalintu hadday tahay mid ka wacyi gashan kana digtoon danbiga kufsiga ogna waxa kasoo gaari oo dhiba hadday gaystaan amaba loogaysto way yaraan lahaayeen dhacdooyinka kufsiga amaba way dabar go,i lahaayen ,sababtoo ah waxay bulshadu haysata dhalin wacyi fayow wadata . Saddexdan qodob ayaa noola muuqatay in lagu Dabar jari Karo falalka kufsiga , haddaba way jiraan intaan in kasii badan oo lagaga hortagi karo kufsiga rabbi haynoo badbaadshe gabdheheena soomaliyeed.(**Aamin ila dheh Eebehen haynoo Aqbalee**)

kufsi iyo kadeed dumar

Cutubka:2aad
“Qisooyin Cibro-Qaadasho leh”

Qisadda 1aad:
***“Haweeney la kufsaday 16jirkeedi
65jirkeedii sheegatay”***

Haweeney ayaa ka sheekeysay 50 sano kadib sida ay uur ku yeelatay ka dib markii uu ku casuumay qol uu ka daganaa hotel DJ-ga la yiraahdo Jimmu Savile, islamarkaan uu kufsi u gesytay ayada oo aheyd markaa 16 jir bikro ah sanadkii. Haatan waa 65 jir, waxa ay soo xusuusatay in ay aheyd ceeb in hooyadeed dhaqtar geysa “waxaan sameynay dhiciseyn sharci darro ah, ayada oo aan la isiinin xanuun baabi’iye 1963 ayay aheyd markii ay is arkeen ninkan kufsaday ee lagu magacaabo Savile waxuuna markaa ku casuumay Radio ku yaalla Luxemburg, halkaasoo uu DJ ka ahaa, si ay uga hadasho naadiga ay ka tirsaneyd ee la yiraahdo Elvis Presley fan club.

Waxuu u sheegay in uu doonayo inuu la kulmo bisha soo socota, Elvis oo isagu ahaa jilaa, waxuu ayadu waydiistay ina ay siiso sawirkeeda si uu u tusiyo King Elvis.

Gabadhan da’da yar waa la kallifay waana laga farxiyey. Soo laabashadiisii Savile waxuu soo wacay gurigeeda si uu ugu casuumo hotel uu markaa ka daganaa London,

kufsi iyo kadeed dumar

maxaa yeelay waxuu u sidaa hadiyada uu ka keenay King Elvis. Inantii waxey soo aaday hotelkii uu daganaa ee ku yaallay Russell Square, London. Waxey qalbiga iska dhaheysaa ‘Haddaan maanta dhinto waxaan aadayaa Janno (Sidey Hadalka U Dhigtay) maxaa yeelay waxey u dhwodahay inay soo arago qof la soo hadlay King Elvis”.

Ayadoo jabineysa 50 sano oo aamusnaan ah waxey tiri ” Ma aheyn wax la qiyaasi karo xaqiiqdii sida aan ugu faraxsanaa waxa uu iiga siday King Elvis qiimaha ay ii lahaayeen”

“Qolkiisu waxuu ku yaallay dhulka hoostiisa, waa dabaqad hoose, waxuuna dhanka midig ka xigay qeybta soo dhoweynta (reception). Waan u garaacay isla markiina wuu iga furay isaga oo gashan bijaamo ama dharka uu ku seexdo”.

“Qofka qura ee aan waligey arkay , isagoo gashan bijaamo, xilligaas ka hor, waxuu ahaa aabahey, aad baana ula yaabay”.

“Isla markiiba aan gudaha u galay darbiga ayuu igu nabay si xoog ah, waxuuuna bilaabay inuu si qasab ah igu dhunkado”.

‘Idhaaf....idhaaf’ ayaan ku iri. Waa uu sii waday isagoo igu boorrinaya inaan

dagaalamin. “Waxaad tahay qof qurux badan” ayuu

kufsi iyo kadeed dumar

igu dhahaayey.

“Waxaan rabay inaa qeyliyo si xoog ah hadana aad baan u xishooday inaan saas yeelo, waxaana ka baqaayey inuu qof kale i ogaado”.

Waxey sheegtay sidi loogu qasbay ee sariirta

sahalka loogu tuuray inay ahayd qof fudud oo dhowr iyo toban jir ah miisaankeeduna ahaa 42 Kg.

Waxey tiri “Ma istaajin karin...waxaan u sheegayey oo qura in ay tanii dhawaawaceyso..aad baan isku adkeeyey jir ahaan si aan isugu dayo inaa iskaga joojiyo weerarka...laakiin aad buu u cuslaa wuuna xoog badnaa”.

Markii ay wax walba dhamaadeen ayuu igu yiri “Hadda waad fiican tahay waxne kaama haleysna” isagoo markaa iska dhigayey inuu ii sameeyey ixsaan.

Savile dharkiisii wuu labistay isla markiina nin baa soo garaacay albaabka. Wuu ka furay waxuuna iisoo eegay si toos ah, aniga oo markaa ku argagaxsan sariirta dusheeda.

“Savile ayuu waydiiyey inuu casho u baxayo iyo in kale, aniga ayuu isoo eegay Savile waxuuna i su’aalay haddii aan ku biiraayo oo aan raacayo. Madaxa ayaan ruxay

kufsi iyo kadeed dumar

wuuna baxay”. ayay tiri. “Savile waxuu ii reebay oo uu miiska ii saaray saddax warqad oo ay wax ku qoran yihiin, si toos ah bey uga yimaadeen King Elvis. Waxaa ku qornaa (I’m kissing cousin)” ; Kissing Cousin waxaa la dhahaa ina adeerka kiisa aan saxda aheyn yacni aan adeerkaa dhalin, ereygane waxuu tixraac u ahaa film uu isaga ka muuqday ama wax ka jilay hadda ka hor. ilaa iyo maantana waa ay haysataa waraaqahaasi.

“Waan soo baxay tareen ayaan soo raacay si aan u imaado guriga, waxaana aad uga walaacsanaa in ay dadku i sheegaan” ayay itiri

“Aad baan guriga uga soo daahay, waxaana isku qasbay inaan wax walba caadi ka dhigto”.

Waxey waysay oo aan u imanin laba xilli caado ama dhiig, waxeyna isaga shakisay in ay uur leedahay. Hal maalin bey fasax ka qaatay shaqadeeda, waxayna isku dayday ina ay iska soo rido uurka inta uusan sii waynaanin.

Waalidiinteedu way garteen in gabadhoodu wax ka qaldan yihiin, hooyadeed baana su’aashay in ay uur leedahay iyo in kale.

“Waxaan u sheegay inaa filaayo in aan leeyahy uur” ayay tiri. “Way garteen in uu yahay Jimmy Savile maxaa yeelay isagaa soo wacay isla toddobaadkaas gurigeena.

kufsi iyo kadeed dumar

Hooyadey ayaa ku tiri gabadhu waa xaamilo, wuxuuna ku yiri “Suuragal maahan! maxaa dhacay”. Sidaas uu yiri ka dib mar danbe ma uusan soo wici guriga” ayay sii raacisay.

Way ilmeysay si aad ah, waxayna u wacday aabaheed, oo ahaa tuubiiste, guriga hortiisa ayay ku barooratay. “Gabadhiisa oo xaaladdaan ku jirta aad bey ugu adag tahay ma ahan wax la qaadan karo” ayay tiri. “Hooyadey waxaa soo koriyey waalidiin diinta ku adag (Christian ah), waxayna aheyd mid qiiradeedu yar tahay oo ficilkeedu badan yahay”. Maamadii waxey gabadheedii u wadday dhaqtar xaafadda gudaheeda xarun ku lahaa subax axad ah. Markii uu qalliinkii badankiisa soo dhamaaday.

Dhaqtarka waxaa la ogaaday inuu ahaa dhaqtar ku shaqeysta dhiciseynta kana fuliyo xaafadda, maadaama uu ahaa sharci darro xilligaas dhiciseynta. Xeerka dhiciseyntana lama ansixinin waqtigaas waxaana la ansixiyey muddo afar sano ka dib, waxaana dhaqaatiirta sharciyeysan loo ogolaada 1967 in ay fuliyaa arrintaas.

Dhaqtarku waxuu ka qaatay qidmo dhan 150 Pound oo maanta qiime ahaa u dhiganta 2200 oo Pound. Wax xanuun baabi’iye ah lama siinin, waxayna ku sifeyneysaa in si xoog ah oo loogu celineyey sariirta xanuunkuna uu sii baahayey intii ay howshu socotay.

“Waxii inoogu darnaa wax ahaayeen inaan awoodi

kufsi iyo kadeed dumar

waynay inaan iska bixino qarashki dhiciseynta sidaa darteed waxaa naga dhiibtay ayeeyo oo labadii sano ee danbe aan u yar-yareynay. Waxaan ka yar yareeyey mushaharkeygii caadiga ahaa” ayay tiri. Waxaan ahayn qoys aad isu jecel oo wax walba ka dhaxeeyo sidaa darteedna waxay noqotay wax aad ugu adag waalidkeyga” ayay sii raacisay. “Waligeey kuma aanan fakarin inaan sidan uga sheekeyn doono. Waxaan ahayn qoys yar oo ka soo jeeda Essex. Isaguna, waa Jimmu Savile’e, soo rididdi uurka ka dib marna kama aanana wada hadlin waxi dhacay”.

Sanad ka dib markii ay gaartay 17 jir waxaa ay shaqo ka heshay wakaalad wax xayeysiisa, waxeyna ka bilowday shaqo shirkado caan ah oo ay ka mid yihiin Marks & Spencer iyo sidoo kale Gillette razors.

Markii ay gaartay da’da 23 ayay mar kale si lama filaan ah ula kulantay Savile oo ahaa ninkii dhibaataada wayn mariyey, xilli shirkaddii ay u xayeysiineysay waxyaabaha ay u dirtay in ay ka gadaal cayaaraan rag DJ yaal ah oo uu isagana ka mid ahaa kuwaasoo ayagana kusoo bandhigayay halkaas.

Waxey tiri ” Aad baan u farxay inaa showgaas qayb ka ahaado isla markaana aan xernaado baantis madmadow oo soo jiidasho leh. Waxaan moodayay in

kufsi iyo kadeed dumar

xirfaddan ay aad iigu fiicnaaneyso.

Laakiin markii aan meesha gaaray ayaa la iisheegay in uu Jimmy Savile meesha yimid, waan jirraday.

Inkastoo Jimmu Savile uu geeriyooday sanadkii 2011 isagoo 84 jir ah haddana waxuu caan ku noqday kufsiga, isagoo xadgudub kula kacay 177 dumar u dhexeeya 5 jir ilaa 75 jira.

Ninkan waa Jimm Savile waxaa lagu helay 200 kiisas oo dambiyo ah, kuwaasoo laga diiwaan geliyey 28 sadhig Boliis, kiisaskaas ayaan u badnaa kufsi.

Wuxuu dhintay bishii November sanadkii 2011 isagoo uga harsan tahay 2 maalin dhalashadiisii 85-aad.

Haweeneydan la kufsaday ee ka sheekeneysa qisadaas waa xaas leh saddex caruur ah haatan iyo dhowr ay u tahay Ayeeyo, laakiinse waligeed ugama sheekeyn ilmaheeda.

Waxey kaloo sheegtay in dhowr jeer ilmo ka soo dilmeen markii ahayd dhowr iyo labaata jir, mana garanaay ayey ineys sabab u ahayd soo xaaqiddii la igu sameeyey.

kufsi iyo kadeed dumar

Markii uu geeriyooday, waxey sheegtay in ay ka xumaatay sida dadku u ammaanayaan, waxey kaloo caddeysay in bogsootay markii ay maqashay inuu gadaasheed kufsaday gabar walbo oo ka soo hor baxday, waayo ayey tiri wuxuu ahaa ayaa lawada ogaada. Qisadaan waxaan ka qaadan karnaa

“waxaad qarsatid way ku qarsadaan”

Qisadda 2aad

Kufsi loo gaystay hooyo Aamina ibraahim

Hooyo Aamino waxa ay ka sheekeeneysaa habeen uu nin u soo galay gurigeeda ku yaal bartamaha-koonfurta Soomaaliya, iyada la jiifta carruurteeda, oo uu ku jiro cunug 4 cisho kaliya jira, kaddibna arxan darro ah kufsi u geystay.

Hooyo Aamina oo naafonimo ka qaadday saameynta daba-dheeraatay ee cudurka dabeysha ayaa waxaa ay awoodi kari waysay in ay ka baxsato ninka soo weerarray. Walwalkeeda ugu weyn waxaa uu ahaa in aysan hurdada ka soo kicin carruurteeda yar.

“Markii uu dhibka igu dhacay kaddib, waxaa iga tagay dareenkii waxaana iska yaallay dhulka qabowga ah ilaa iyo aroortii markii uu guriga yimid seyigeyga,” ayay xustay Aamina, ayada oo intaasi raacisay in uu ninkii kufsiga u geystay uu habeennimadii baxsaday asaga oo horey u qaatay talefoonkeeda, isla markana uu ka tagay ayada oo aan haysan qaab ay dadka kula xiriirto.

“Xanuun daran ayaan jirkeyga oo dhan ka dareemay. Markaas weli si fiican ugama aan ka soo kabsan dhalmada canugeyga,” ayay tiri. “Waxaan dareemay

kufsi iyo kadeed dumar

daciifnimo, daal iyo awood la'aan. Awood aan ku qayliyo si aan gurmada u helo ma aan lahayn."

Inkasta oo ay ku soo weynaatay sanadihii Soomaaliya ugu colaadda badnaa, Amina marnaba kuma fikirin in ay la kulmeyso dhacdadan naxdinta badan. Dhibkan loo geystay waxaa uu xoojiyay naafonimadeeda, isla markana waxaa uu xadeeyay socodkeeda, Muddo dheer kaddib habeenkaas naxdinta leh, waxaa ka tan batay murugo. "Shoog ayaa igu dhacay, dhowr maalmood ayaan ooynaayey. Canugeyga waa nacay, wax xiriir ahba lama sameyn karin. Dareenkii oo dhan baa iga lumay," ayay xustay.

Ninka Hooyo Amina dhibka u geystay, oo ilaa iyo hadda weli gacanta lagu soo dhigin, waxaa suurtagal ah in uu ogaa in uu seyigeeda guriga ka maqan yahay habeenkaasi. ***"Kufsigu waxaa uu baabi'iyay kalsoonideydii, wuxuuna la tagay farxaddeydii. Balse waa qaddar alle,"*** ayay tiri Hooyo Amina.

Qisadda: 3aad
Ugu bishaareey dil kan wax dila
waqtiba haga soo wareegatee

Nin ayaa ka shaqeysan jiray doon yar oo dadka ku gudbin jiray, haweeney wadata ilmo labo sano jira ayaa malin raacda.

Ninkii doonida wuxuu damcay inuu kufsado, way diiday. ilmihi yaraa buu lugaha ka qabtay oo madaxa u geliyay webiga si uu ugu cabsiiyo oo ay u ogalaato ,oohin bay ku dhufutay ,majirto cid ka celinaysa,waxay is tiri badbaadi oo waa ay ogalaatay marka uu wax uu doono ku sameeyay ayuu hooyadii iyo ilmihii yaraa badda ku tuuray halkii ayayna ku dhinteen.

Muddo ka dib ,subax aroor hore ah isagoo xoolo soo qalay oo dhiig leh ayuu arkay nin waddada yaal oo mindi lagu dilay, wuu ka leexday si uu u eego. Boolis ayaa goobtii yimid isla markiiba.waa la xiray ninkii ,maxkamad baa la geeyay ,booliskii soo qabtay ayaa

ku marqaati furay in ay cadeyn hayaan ninka inuu dhiig lahaa,mindi weyna sitay,waxaa lagu xukumay dil toogasha ah ,wuxuu codsaday inuu hadlo intaan la toogan.

kufsi iyo kadeed dumar

Wuxuu yiri “ Xaqiiqdii, ninka hadda la ii tooganayo Anigu ma dalin , balse naf ayaan horay u dilay hooyo iyo ilmaheeda yar ,una kufsaday 10 sano ka hor cid noo jeeday majirin , waana iska hilmaamay,marka dambigaas ayaa manta la iga jarayaa”

Qisadaan waxaan ka qaadanaynaa

“ si kastoo dhalinyaradu isu yiraahdaan cidna ma aragto waxa aad gaysanaysaan, xusuusnow markasta in allah SWT ayaa wax kasta arka oo xaqsoore ah , banaanka u soo saara falka aad sameeyso waqti kasta ha qaadatee.”

Qisadda 4aad : Dhowrsanaanta

Qisadan oo ka hadlaysa dhowrsananta aya waxay ku dhacday sheekh da'ayar oo la oran jiray Abu-Bakar Al-miski oo aha nin akhlaaq iyo asluubi ku dheehan tahay,ninkan oo tuuulo ku nooola ayaa waxa cashaqday gabar tuulada dadka ku nool kamid ahayd ,gabdhah oo la dhacday akhlaaqdiisa iyo cilmigiisa ayaa naaag shaqaaleheeda kamid ah ku tri " Utag shiikha una sheeg inuu guriga iigu yimaado suaaal diini ah ayaaan waydiin raba" , naagti shaqaalaha ahayd ayaa utagtay shiikhi arrinkiina usheegtay intaas kadibna wuu soo raacay oo gurigii ayuu uso raacay, markii ay gurigii yimaden wuxu arkay inay arrintu kabadalan tahay sidii looso sheegay , qoftii guriga lahayd waxay ku tiri naagti shaqaalaha ahayd

"bax albaabkana siiixir" ,markaas ayay shiikhi ku tiri:-" Shiikhow aad ayaan kaaga helay akhlaaqdada, dhaqankaaga wanagsan iyo quruxdada intaba, waxan raba inaad iskeen siiiso hadda oo waan kubahnahay,haddii aad diiido waan qaylin oo dadka ayaan ku oran shiikhu wuu ikufsan lahaa halkaas ayaad sharaftaada ku waayaysa" , shiikhii wuu yara fikiray wuxuu ku yri:- " bal waayahaye suuliga itus",suuligii ayay tustay cabbaar marku suuliga dhex fadhiyay ayuu Eebe qalbigiisa kusoo riday suuliga saxarada taal is marmari si ay gabadhu kuu nacdo, cabbaar kadib ayay timid suuligana kuso garaacday inuu diyaar garoobay iyado

kufsi iyo kadeed dumar

waydiinaysa, markaas ayuu Albaabka furay mise shiikhu
waa wada qurun, markii ay aragtay ayay iska soo erisay
iyadoo ku tilmaamaysa inuu waalan yahay Eebena saas
ayuu uga soo badbaadiyay foolxumo uu samayn lahaa ,
habeenkii markii la gaaray oo uu seexday ayuu ku
riyooday Eebe oo kuleh " waxad noo samaysay waxan
horta cidna samayn
,waxanu kaa ballan qaadayna inaanu ku carfino aduuunyo
iyo aakhiroba" , subaxdi marki la waabaristay ayuu soo
kacay isago Miski ka urayo saas ayaa loogu baxshay ABU-
BAKAR AL-MISKI .

***“ Qisadan waxaan usoo qaatay waxay la
jaanqaadi karta Samankan aynu joogno oo ah
Saman aad iyo aad looga bahan tahay qofka
dhalinta ah inuu dhowrsoonaado ama lab ha
ahaado ama dhadig.”***

kufsi iyo kadeed dumar

Cutubka:3aad
“Murti looga hadlay kufsiga”

Gabay: kufsigu ka daran geerida

Abwaan:Maxamuud Axmed Cabdalla

*Gef weeyaan Kufsigu lagu galda'o gabadh xijaabnayde
Guba Hooyo, gaasira Ayey, Habaryar goynteede
Gabdhaheenna iyo taan dhalliyo caarka godobayne
Kii geystey naar buu ku geli goobta aakhiro'e
Ifkakan kaan lagaga goyn marbaa laga gudaayaaye
Geeri waa kadaran yahay kufsigu Guullaa maanacayee
Gudcurkii kuwii ugu gabbaday midan gugeed gaadhin
Gaban xuura sebigii kuwii guudka ku xambaartay
Sidii gaan Amxaaraad raggii gigayey jiidhkeeda
Go'ayeeyda goortay ilmada gabax ka siinaysay
Gollaheeda goortay maryaha gacanta saaraysay
Nimankii garayskeeda jaray gooyey hilibkeeda
Riximkeeda beynaad ku godey xididna gawsiiyey
Waa geshashkii ciidammada gaadhka loo diraye
Waa guduri tuutahaw gashaday gaade iyo boobe*

kufsi iyo kadeed dumar

*Mooryaan galluubtii kharribay goofkii Huriwaaye
Meeday dawladdii goyn lahayd xaqaa guddoonkiisa?
Afartaa dareen guba naftiyo lama garaystaan dheh
Gamaa igu lignaadiyo mariid gaadhay feedha dheh
Galiilyo iyo ciil gaaxdayoon laga garaabayn dheh
Dhaaxay gumaad iyo xasuuq Xamar ku gaaleene
Dhaaxaa gurbood iyo haween loogu gaalibaye
Guudcaddaaga dhaaxaa la dilay oday garboodkiye
Girliigaanku dhaaxuu ka ciyey gole nabdoonaaye
Mooryaan gadooddiyo dagaal geeri badan keena
Dagaal ooge guubaabiyo qolo ku guuraysa
Goor iyo ayaan maatadoo gawrac lagu seemo
Gafuurduub gacmaha goysa iyo golihii qaaciido
Muqdishaaq goleeyaay sharbaa kugu gadaannaaye
Goodkiyo abeesadu aday kugu gabraartaane
Nabsi soo gadaal baxa hadmaad godan barwaaqoobi?
Goormaa caddaaladi galladi golaha qoyskaaga?
Goormaa la soo qaban raggii gabanta naafeeyey?
Waa geshashkii ciidammada gaadhka loo diraye
Waa guduri tuutahaw gashaday gaade iyo boobe
Mooryaan galluubtii kharribay goofkii Huriwaaye
Meeday dawladdii goyn lahayd xaqaa guddoonkiisa?
Meeday dawladdii goyn lahayd xaqaa guddoonkiisa?*

Gabay:kufsigii goldogob

Hal-abuur sakariye maxamed

*Cabdiyoow aduunyadi dhammaan haatan eed unbaa
dhiciye....*

Hadaan erayo guud bal aan aayar u idhaahdo....

Asalkooda soomaalidaan ubucda dooxeysa...

Afarteeda geesood wakaa uuradaa bixiye...

Olal baa ka dhacay goobti oo walagu amuudaaye..

Aleylkii dhexeey meerayaan aqaladeeniiye...

Nin dantiisa eegana hayeey amar ka qaataane...

Haatana hadaan kuu aqriyo erayao dheeraad ah..

Inan yarbeey asiibeen rag aan aakhiro maqale

Ableey iyo adimo iyo waxeey oofta jabiyaanba..

Aminkii dambeeteena farjigi lagu asteynaayay..

Isticmaale meshaa waxay inantu ooydaaye

Allahayoow raggii galay dambiga urug lataahaane...

Ibtilana allahayoow abaalkiisu noqoyaano laga reysan...

Gabaygana ebyaye dadyahow ducada Amiin dhaha

Maansada Curdin-dhadhiye

Abwaan: Siciid gahayr

*Maansadani waxa ay soo baxday 27kii Feberweri
2019ka, waxay ka hadlaysaa gabadh yar oo 12 jir
ah, oo kufsi, dil iyo xadgudub loogu geystay
magaalada Gaalkacayo, xarunta Gobolka Mudug.
Jidhdilka iyo naxariis-darrada dhacday waxa
lagu astayn karaa dadqalnimo*

*Cawdeedu markay baxdee
Cammuuddiyo iil la dhigay
Waxay ku casuuman tahay
Cawada jannadii Allee
Waxay ka cataabaysaa
Caynkii ifka loogu galay*

*Dareenka haddaan cabbiro
Waxay tidhi Caasha-yarey
"Carruurtu ma ay mudnayn
Inay carcaraaf martee
Wuxuu canug kaa geyaa
Inaad carbisood hagtood*

kufsi iyo kadeed dumar

*Asluubta cuddoon bartee
Haddaan curdin-dhadhiyihii
Kuwii cawo-beelka falay
Cadaawe sidaan ahaa
Kuwii i ciqaabay'ee
Caarcaarka naftayda baday

Cadkaygana sii jarjaray
Caddaalad haddaan la marin
Cawaaqib xun baa ku xigi"*

*Waxay tidhi Caasha-yarey
"Dameer calcalyada dhergaa
Markuu cosob goosto doog
Lammaanaha caacsadee
Sidiisa dad baa cahdigan
Ucaydhsada maatidoo
Dar baa jira caadhku hago
Cufiyo tamar maan lahayn*

*Calyada qurux loo qubiyo
Wuxuu igu caashaqiyo
Calaamado jiita iyo
Ma lihi cambaruud bilnaa
Cimrina qaangaadh ma ihi*

kufsi iyo kadeed dumar

*Culaysna ma qaadi karin
Caalluhu naxariis darnaa
Markaan cawday een "adeer"*

*Codsiga "igu daa" ku idhi
Cafiska iimuu tixgelin
Ilmada canka buuxisiyo
Codkaygana wuu bannaaday"
Waxay tidhi Caasha-yarey
"Hooyadu cudud bay u tahay
Caynaanada aadmigee
Caloosha kuwaan sidnow
Marka kale calmashada jacayl
Kuwaan calafkooda guur
Cawayska la loolaynnow*

*Cuurkaanu walaal nihiyo
Cidla'da wehelkoodiyow
Cakuye aabbaha mar kale
Caleenta la saarayow*

*Caliimku ragguu xillkiyo
Cayaanka u dhiibay ow
Maxaa caqligiinni helay
Wax ceeb ah inaad dhigtaan*

kufsi iyo kadeed dumar

Miyaan laga caagahayn?

Haddaan cilladdaa la dayn

Allaa ka cadhoonayee

Intaad is-canaana taan

Codkiinna ku diida tuu

Cawaanku haddeer ku kacay

Carraabaye duulka nool

Ka jira camalladan gurraacan”

Waxay tidhi Caasha-yarey

"Calaacal wax kuuma taro

Cabaadka la faafin iyo

kufsi iyo kadeed dumar

*Waxaa cabashadan tiftaa
Dadyahaw celinaaya ficil
Xumaa lagu caabbiyee
Is-kaashada caalamkow
Xishoodku nimaanu celin
Coobbiyo ku muquunsha qori
Ishii Cali waa digniin
Caanyadu wax ku qaadatee
Haddaan xadgudbaha cadkiyo
Cidaamkiisaba la goyn
Ciriqa lama baajin karo”

Waxay tidhi Caasha-yarey
"Halkii cudud xoog leh mudan
Cambaari ma kaafidee
Cabbaysta hubkiinna oo*

kufsi iyo kadeed dumar

*U ciidama hiilka dumar
Cabsida ha ku joogsadee
Cadaadiya kii shar wada”
Waxay tidhi Caasha-yarey
"Waxaa carrigeenna nool
Intay bilistii cuneen
Kuwii cawrada sawiray
Cadqaate waxaa fasaxay
Caantaynno ku qaata dhagar
Bulshada ceeb baa dul taal
Caruuska midduu galay
Ninkii curaddeedda dilay
U dhaafayna caydigiyo
Midkii yarta ceejiyee
Intuu cararkii firxaday
Dhallaanka la caymadee*

kufsi iyo kadeed dumar

*Beentana ku caquuqay baa
Burcana ku cabbaaya liin
Dharaar cad miyaad dishaan?"
Waxay tidhi Caasha-yarey
"Nin ciidan ahaa rasaas
Ciqaabta miyuu haween
Cadradda shiish jaan ku deyay
Ku ciil baxay toogasahada
Haddaan casharkaa horiyo
Cibaaradu dheef ku barin
Wallee cudur sii kordhiyo
Caadaysiga oo socdiyo
Inuu dhaco caabaq filo"*

Gabay: fajac

Abwaan: ismaaciil geele gabayre

*Nimanyohow fasaad baa dhiciyo fool xumiyo ceebe
Arin iga fajicisaan arkoo faaninahayane
Ragayagu wuxuu faani jirey ways fashiliyeene
Fasalada hablii dhiganjirey fara Xumeeyeene
Allaylehe marnaba Kama filayn ficiladoodaase.
Falfal xumidu qayb bay katahay dhaqamadaan fool xun*

*Filimada xun bay fiirsadaan weyna fuliyaane
Fikirada shisheeyehey hablaha kula falaadane
Allaylehe fariin ceeb ah bay dunidu faalayne.
Faa iido male duul haduu diinta Faaruqoye
Food leyda iyo hooyadii fooshaba idlaysay
Fursad bay u moodaan ileey xoog yaray filine
Cudurayna faafinahayaan falalka ciir moone
Allaylehe fux shigi oo batiyo faajir nimadii dheh.*

*Awrtuba hashii foola iyo ubad ma fuulaane
Wanka yaroo funaga iyo orgigu waxar ma fiir shaane
Far masaarayaan dibidu weyl mana facays taane
Xayawaankii inaytahah faxsheey uga fogaadene
Raga qaarna Kama fiirsadaan manafahmaayaane
Alleylehe fir coonkii ma falin faasiq nimadaase.
Kuwa fiirsanaayiyi gabdhaha nimanka feenaaya
Fara badanayaal maamul iyo dawlad federalba
Marna sooma ay fara geshaan kamana faaloone
Allaylehe garsoor fiican iyo fursad May heline.*

kufsi iyo kadeed dumar

*Culimadu dulmiga faafayaa Kama fadwoodaane
Faataxa haloo Kala mariyo xeerarka u fiirsha
Xaajada mid sii foorarshiyo fulayga loo dhiinye
Umadana lagu soo fasixin foodo wadayaale
Allaylehe sharcigii Lama fushee waa la fududeeyne.*

*War hoy dumarku waa fir kayimid feertii nebi aadam
Waa fiiladii laga far camay uguna fiicnayde
Mar waa hooyadii foolatee faaruqayn abide
Marna faadumadii aad dhashiyo far lagaa jaraye
Marna waa farxiyo kuu dhaxdoo dhigi furaash kaaga
Marna waa fartuun aabe dhalay aad dad ugu faanto
Allaylehe fariid kuma fekero fiila weeraroye.*

*Haku faanin foor boynti fayf waa fidniyo ceebe
Fadeexeeya kii garab u fidin oo ficilo keentay
Ha fariisan goobtuu fadhiyo una firaaqeeya
Allaylehe fasaad Wade dadkaa laga faquuqaaye.
Muslinimo aad buu uga fogyahay ficilka sheydaan
Ninkastoo falkaa geysta oo Fara ku dhiigla ahba
Faaqida duliga foosha xumi wuufakanayaaye
Fagaaraha kusoo xira dadkana fayl usoo geliya
Dabadeed wixii eebe faray fuliyawaa khayre.*

kufsi iyo kadeed dumar

Maanso: kufsigu haweenka

Hal-abuur:Xudayfa cabdulah

Waa hooyo soo kici markuu eebe koriyaaye

Waa udub dhexaad ina kabiyo kaalinxoog badane

Waa kiilo culus iyo kuwey karisay fooshiye

Wa kuwa markii aad kufataba laabtu kululaane

Waa kuwa kalaamida ku baray kaafka aad orane

Ayagaa ku koolkooliyoo kiis xun kaa duwaye

Waxa ay kadeed badan u martay daalka iyo kaarka

Inaad hesho karaamiyo cisiyo goorhasoo kaco e

Kuligoodba hooyiyo walaal xaas ku kaafisiyo

Garoo waa midaad korisayoo koonka kuu jecel

Kolkaan wuu abaal dhacay ragii loo kashleyn jiraye

Hadii cadaalad la hor keeni laa ma ay kadeedeene

Kob kastaba waxaa laga tabshaa kalif haweenade

kufsi aad u badan baa ka dhacay kaamil wadankiye

Xuma fale koryeel dumarku wa dheymantoo kale e

Ogsoonow kariimkaad hortagi maalin kaligaaye

Cutubka 4aad:

GUNAANAD

Alle ayaa mahad oo dhan iska leh marka hore ,
gunaanaadka buuggayga waxan ugu tala galay ama aan
jeclaystay madaama aad soo ogaanay Ama aanu soo
baranay kufsiga qeexidiisa, dhibaataadiisa, saamayntiisa
iyo waliba wax kasta oo la halmaala kufsiga inaanu
akhristaha Buuggan ugu soo jeediyo waanooyin iyo
tusaalayaal aanu kuso afmeeri doono buuggan .

Haddan uguda galo dhabtii waxa looga bahan yahay
ruuxa muslimka ah dhalinta ah inuu aad isaga dhowro
wax kasta oo ku sababi kara sharaftiisa inay hoos
udhacdo sida:- sinada oo ay soo hoosgalayan kufsiga iyo
wixi la hal maala oodhan , gaar ahaan haddii aad gabar
tahay waxa kugu waajib ah inaad naftada dhowrto maxa
yeelay wax kasta oo ku dhaca gabdheheena soomaliyeed
waa wax ay gacantooda ku keensadeen sida:- inay
gabadhi dhar jirkeeda aan wada asturayn oo ay xirato,
saas darteed ayaa waxa kuso raacaya intii xun oo dhan .

Mid labaad oo aan kuso qaadanaayo waanooyinka waxa
kamid ah Soonka oo ah mid looga bahan dhalinyarada
muslimka ah kasoo uu tilmaamay nabigeena (NNKH)
xadiiskii uu warinayay Abu saciid al khudriyyi oo uu
rasuulku ku war galinayay dhalinta inay guursadan
hadday awoodan haddi kalena ay sooman, xadiiskan
waxaynu ka baranaynaa Nooc kamid ah waxyaabaha

kufsi iyo kadeed dumar

hadda waqtigan casriga ah la ogaaday oo ah soonku inuu dajiyo qofka baahidiisa lab iyo dhadig wuxu rabo ha ahaado.

Tan sadexaad waanadan waxay ku socota waalidka oo ah meesha asalka u ah qof kasta oo Barbaar ah, waalidka wax dhalay waxa looga bahan yahay tarbiyaynta ubadka, in lagu tarbiyeeyo oo la baro dhaqanka wanagsan haddii kale waxa inagu dhex barbaaraya ubad aan dhaqan iyo asluub midna lahayn, waxa inagu dhex barbaaraya wax aan naxariis iyo diir naxa midna lahayn, waxa inagu dhex barbaaraya dadka kufsanaya gabdhaha yaryarka ah ee 10 jir iyo wixi u dhowdhow ah, waxan shaki kujirin kuwa waxa samaynaya ee waxas ku dhaqaaqaya inay gabdhaha kujeestaan walalahood ah waalidkood ayaan dhaqanka wanagsan tusin.

kufsi iyo kadeed dumar

Mid afraad waxan ujeedinaya odayaal dhaqameedkeena
khayr alle hasiiye inaysan udoodin ama aysan ka khafiifin
ciqaabta lagu soo rogo qofka waxa xun ugaysanaya
gabdheheena sababtoo ah waxaynu hubna qofka
udoodaya qofka waxa gaystay haday tan lagu xad gudbay
ay ahaan lahayd gabadhiisa ama walashi ama qof
qoyskiisa kamid ah isaga ayaa gacantiisa ciqaabta ku
Marin laha, marka waxan leenahay yaan laga doodin oo
loodoodin ciqaabta la maraniyo qofka ku xad gudba
gabdheheena somaliyeed, sababto ah waxay inagaga
yaallan meel aan ku haboonayn in laga doodo xaqooda.

Dhamaad

Tixraac

Qoraa Naasir Cadceed

Qoraa Khaalid xasan